

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 17.5-aad. Garowe 08 August, 2015

Lam.8

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA
Qaybta Koowaad
Ansixin iib guri

Qaybta labaad
Xeer
Waxba ma leh
Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.
Waxba ma leh

Sharci Lr 10. ee 08/08/2015, kuna saabsan Ansixinta iib guri ay iibinayso wasaaradda Xannaanada xoolaha Puntland



PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Sharci Lr. 10 ee August 08, 2015, kuna saabsan ansixinta iib guri ay iibinayso Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Puntland.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPLS/50/2015 ee 25/07/2015;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda xeerkani u leeyahay Dawladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen iibka guriga wasaaradda Xannaanada Xoolaha Puntland


Qodobka 2-aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.


Qodobka 3-aad

Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa marka Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.


Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بونت لاند الصومال

مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 50 /2015

Garoowe

Taariikh:- 25/07/2015

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixin Iib Guri

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 52.3

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/
497/2015 ee July /4/2015 kuna saabsan iib
Guri .

MARKUU TIXGELIYEEY:

in Wasaaradda Xanaannada Xooluhu hesho
Xarun ku filan hawlaheeda baaxada leh

MARKUU ARKAY:-

Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu ku
ansixiyey 22/07/2015 iibinta Guriga
Xanaannada Xoolaha .

Wuxuu Guddoomiyey:

Ansixin iibinta Guriga Xanaannada Xoolaha ee Garoowe

GUUL EEBBE

Md. Siciid Xasan Shire

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL



Tell:- +252 90 7796136 am +252 90 7798430

Email: gud.baarlaman.pl@gmail.com parliamentspeaker@gmail.com, puntlandparliament@gmail.com

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

الرئاسة
مكتب الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Ref: MW/DPS/ 497/2015

Garowe جروي

July 4, 2015

Ku: Guddoomiyaha Golaha Wakiiladda Puntland

Og: Wasaaradda Xannanada Xoolaha


Ujeedo: Soo gudbin iib guri.

Tixraac: Shirkii golaha xukuumadda ee ku taarikheysan 26/06/2015 ayna golaha xukuumadda ay ku ogolaadeen in la iibiyo xarunta dhexe ee Wasaaradda Xannanada Xoolaha.

Haddaba, mudane Guddoomiye waxaan halkan kugu soo gudbinayaa in shirkii Golaha Xukuumadda ay ku ogolaadeen in la iibiyo xarunta dhexe ee Wasaaradda Xannanada Xoolaha si Wasaaraddu u dhisato guri weyn oo cusub kuna filan hawlaha baaxada leh ee horyaala Wasaaradda.

Sidaas darteed, waxaan Golaha Wakiilada ka codsanaynaa in ay ka doodaan kadibna ansixiyaan.

Wada shaqayn wacan.


Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland

